



## Oregon waxay sare u qaaday heerka qiyaasta ee xisaabta.

Gudiga waxbarashadda ee Gobolka waxa uu imika bedelay dariiqadii uu u qiimayn jiray maahirnimadda xisaabta ee ardayda fasaladda 3 illaa 8aad.

Isbedelka waxaa loola jeeda in ay ku adkaan doonto ardayda fasaladaa ku jira, mark lagu daro ardayda Dugsiyadda Guud ee Portland, si ay u gaadhaan heerka xisaabta-xataa hadii xirfadooda xisaabta la saxar tiray tan iyo intii lagu sameeyey qiimayntii ugu dambaysay.

Si inbadanna ka waasicsan, dugsiyadda PPS waxay tilmaami doonaan diidmadda heerka gudashadda xisaabta ee warbixinadda gobolka iyo federaalka, ugu yaraan sanadka xiga ama laba.

### Maxay yihiin isbedeladdu?

Gudiga Waxbarashadda ee Gobolka Oregon waxa uu sare u qaaday heerka najaxa ee xisaabta. Taa waxaa loola jeedaa in ardaydu ay gaadhaan dhibo sare si ay ugaadhaan heerka gobolku doonayo.

Tani waxa ka dhalanaya ardayda oo dhibco hoose hela iyo dugsiyadda oo noqda in boqolkiiba in yar un ay gaadhaan heerka. Loolama jeedoin ardaydu ay ogyihiin in ka yar intii sanadii hore ama in aysan ku wanaagsanayn dugsiiga.

Eeg shaxanka midigta, iyo eraydda xagga hoose lagu dhigay, iyadii oo ka dhigan waxa isbedelka loola jeedo.


### Maxay Oregon u qabatintay heer sare oo qiyaasta xisaabta ah?

Hal arin oo keliya, waxay unoqonnaysaa ardayda diyaar garoow hagaagsan iyo najax ay ka gaadhaan dugsiiga sare, islamarkaana gaadhsiinaysaa in ay kasoo baxaan shuruudaha qalinjebinta ee Oregon.

Qabatinkani waxa kale oo uu fududaynayaa xaaladaha kal augur ee ardayda si loogu qiyaaso ardayga waxa laga filayo ee heer caalami. Arintani waa ay ku dhiirantahay qiimaynta Oregon.

### Maxay yihiin "Tan laga filayo barashadda?"

Tan iyo imika, goboladu waxay qiimeeyeen ardayda iyagii oo adeegsanaya heerar qiyaas oo kale duwan. Gobol walba waxa uu go'aan ka gaadhayaa aqoonta iyo xirfadda ay tahay in ay ardaydoodu bartaan ee fasalka.



Oregon waxya sare uqaaday heerka najaxa ee qiimaynta xisaabta fasaladda 3-8, si loo qeexo waxa loola jeedo, sawirka sare waxa uu muujinaya ardayda fasalka sadexdaad ee gaadhay heerkii hore ee qiimaynta (dhinacabixid). Fasalka 4aad arday kuwaas oo kale ah ayaa ka saramaray 7 dhibcood kuwaa – way ku filayd in ay gaadhaan qiimayntii hore ee 212, walow aysan ahayn kan cusub ee 219.

Kani waa isbedelka. Oregon waxa ay qayb ahaan ku biirtay 40 gobol oo qabatimay Barnaamijyadda Guud ee Heerka Qiimaynta Gobolka, ee ku sal-xidhan tan laga filayo barashadda ardayda ee K-12 ee xisaabta iyo adabka-luqadda Ingiriisida.

Khubaradda manaahijta, hogaamiyayaasha waxbarashadda, macalimiinta, maamulayaasha dugsiyadda iyo waalidiinta ayaa saaska udhigay Barnaamijyadda Guud ee Heerka Qiimaynta. Waxay ka warcelinayaan aqoonta iyo xirfadda ardaygu u baahanyahay si uu ugu najaxo kuliyadaha iyo shaqadda.

### **Sidee Oregon uqiimaysaa ardayda?**

Oregon waxa ay shardi kaga dhigtay ardayda in ay qaataan qiimaynta guud ee Gobolka ee xisaabta iyo akhriska ee fasaladda 3 illaa 8aad; Akhriska fasaladda 4 iyo 7; iyo sayniska fasaladda 5 iyo 8aad. Ardaydu sidoo kale waa in ay soo dhamaystiraan qiimaynta dugsiyadda sare. PPS waxa ay boostadda ugu diraysaa maxsuulka imtixaanka qoysaska xiliga xagaaga.

Sida guud, Imtixaanadda waxaa lagu magacaabaa Oregon Assessment of Knowledge and Skills, ama OAKS.

Marka lagu daro helida dhibcaha mid walba oo imtixaanadda OAKS, ardayda waaxa la siinayaa “Martabad Najaxa” tani waxa ay timaamaysaa sida ay ardaydu ugu wanaagsanyihiin qiimayntaa. Qaybta Najaxa oo hosaysa, Ku dhow in uu gaadho, Wuu gaadhay iyo Dhaafay.

### **Maxay tahay ujeedada OAKS?**

Inta badan qaybaha, ugudashadda sida ugu wanaagsan ee imtixaanka OAKS ma saamaynayso ardayda shakhsiyan. Gaadh ahaan tani waa fasaladda 3-8, dhibacaha laguma darin warqadda daraajadka ardayda; mana saamaynayaan ardayda, kuliyadaha ama deeqaha waxbarasho.

Siday noqotaba, bilowga fasal 2012, Oregon waxay adeegsan doontaa dhibcayaa hal dariiqad (ikhtiyaaradka dhowrka ah) si ay u ogaato in ardaydu ay helaan diblooma. Macluumaad dheeri ah waxaad ka ogaan kartaa [www.getreadyoregon.org](http://www.getreadyoregon.org).

Marka lagu daro, dugsiyadu waxay adeegsanayaan maxsuulka OAKS si ay u arkaan dariiqadda baridda e shaqaynaysa islamarkaana loo ogaado ardayda u baahan caawinta. Ugu dambayn, howlwadeenadda gobolka iyo federaalk

### **Xagee ayaan macluumaad siyaadda ah ka heli karaa?**

Su'aalaha la xidhiidha Heerka Najaxa Xisaabta ama imtixaanka OAKS, la xidhiidh PPS Qiimaynta iyo Cilmi-Baadhista, 503-916-3341, [rne@pps.k12.or.us](mailto:rne@pps.k12.or.us). Su'aalaha la xidhiidha Barnaamijyadda Guud ee Heerka Qiimaynta Gobolka, la xidhiidh Manhajka PPS, 503-916-6004

Sidoo kale, aqalka Waaxda Waxbarashadda ee Oregon ayaa laga heli karaa macluumaad dheeri ah, Baadh “math achievement standards” at [www.ode.or.us](http://www.ode.or.us).